WARSIDE

ICRC

SOOMAALIYA

# WARSIDAHA BIYAHA

2017



Sida dadka ay ku maahmaahdaan “marka ceelku uu qalalo ayey ogaanayan qiimaha uu ku fadhiyo biyaha”. Dadka Soomaaliyeed uma baahna in ay sugaan ilaa inta ay ka ogaanayaan in ceel-gacmeedyadu ay qalaleen. Dal si aad ah ugu tiirsan beeraha iyo xoolaha, ku tiirsanaanta joogtada ah ee xilli roobaadka ayaa dhaqan ahaan calaaamad u ah qaddarka ku dhaca ragga Soomaaliyeed, haweenka iyo carruurta. Marka dhibaatooyinka cimilada ay saameyn ku yeelaan joogteynta iyo wareegga biyaha oo xilliyada ku xiran, nolosha ayaa si aan la baajin karin u saameysa: biyaha haddii uu aad u yaraado dalagyada way dhimanayaan, xoolahana in badan way la’anayaan; haddii biyaha uu ku badto waxaan arki doonnaa waxyaabo badan oo isku mid ah. Dhaqan ahaan Soomaalidu waxay u suurto gashay in ay wax ka qabtaan isbedeladaan, laakiin ka dib ku dhowaad soddon sano oo iska horimaad hubaysan iyo qalalaase naxriis daran oo aan dhammaad laheyn ayaa daciifiyey habka dabbaraada halka kaabayaasha oo horay ku caawimi jiray in ay biyaha keydiyaan hadana qeybiyaan xilliyada abaarta ama biyo marsiin jireen meelo loogu talagalay waqtiyada fatahaada ayaa si aad ah loo burburiyey ama laga dhigay kuwo aan shaqeyneyn.

ICRC waxay isku dayeysaa in ay yareyso qaar ka mid ah saameynta cimilada aan caadiga aheyn oo colaadaha iyo abaaraha daba-dheeray sii xumeyeen. Abaarta ba’an oo ka dhalatay xilli roobaad si xiriir ah u baaqday oo sannadkii 2017-kii gaartay meesha ugu sarreysa ayaa shidday dhibaato bani’aadamnimo oo gaartay heer aan caqli gal ahayn iyadoo burburisay hab-nololeedkii, helitaanka cuntadana aad ah u yaraaysay iyo malaayiin dad ah ayaa ka barakicisay guryahooda. Mas’uuliyiinta hay’adaha qaranka iyo kuwa gobolka, deeq-bixiyeyaasha iyo kuwa la hawlgala hay’adaha bani’aadamnimada ayaa si wadajir ah u abaabuleen dadaal si ay isugu deyaan in ay jawaab ka bixiyaan dhibaatadaan: ICRCda oo ay weheliso Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), ayaa safka hore kaga jira ka jawaab-celintaan. Waxqabad la mideeyey oo ay ku jirto caafimaadka, nafaqada, gargaarka deg degga ah iyo hawlaha ay qabteen kooxaheena Biyaha iyo Deegaanka waxay ahaayeen kuwo aad u muhiim ah. Ololeyaasha dhiirigelinta fayo-dhowrka, daaweynta ilaha biyaha, rakibaadka bambooyinka biyaha, qodidda iyo dayac-tirka ceelasha, dhisidda dhismayaasha biyaha roobka lagu qabto ama hagaajinta iyo kordhinta keydinta biyaha iyo awoodaha qaybinta ayaa gacan ka gaystay yareynta saameynta abaartaan ba’an oo ay saameysay in ka badan **1.2 milyan** oo qof.

Haddii abaaraha ay barbaarinayaan dhibaatooyinka bani’aadamnimada fatahaadana sidaas oo kale ayey u kobciyaan: Soomaaliya labada ifafaale dhaqan ahaan si kale haddii loo dhigo way isla socdaan, haddii sannadkii 2017-kii ay dhacday biyo yari daran, bilihii ugu dambeeyey 2016-kii qaybo ka mid ah dalka waxaa ka dhacay fatahaado ballaaran. Tani waxay aheyd xaaladda magaalada Beledweyne halkaas oo **70,000** qof ay saameysay fatahaada Webiga Shabeelle, oo mararka qaarkood nolol u ah gobolka, waxay sidoo kale, sida tan hadda dhacday oo kale, sabab u noqon kartaa carqaladeyn baaxad weyn iyo nolol adag. Gargaarka deg degga ah ee loo fidiyey dadka ay saameysay dhibaatada waxaa bar bar socday, mudnaanta ugu weyn ee ICRC iyo kooxaha SRCS oo aheyd in laga hortago faafidda cudurada biyaha ka dhasha, sidaas daraaddeed waxaa diiradda la saaray dadaalo damaanad qaadaya helitaanka biyo nadiif ah oo la cabi karo.

Si kastaba ha ahaatee, dhammaan shaqada la qabtay kuma koobneyn ka jawaab celinta musiibooyinka dabiiciga ah oo ay sii xumeeyeen dhibaatooyinka dadku ay sameeyaan. Sida aad ka ogaan doonto bogoggaan, ICRC-da Soomaaliya waxay gashataa laba koofiyadood: midi waa jawaab-celin deg deg ah iyo sidoo kale mid ah xoojinta hab-nololeedka iyo adkeysiga. Kan dambe ujeeddadiisu waxay tahay in la hagaajiyo kaabayaasha biyaha lagu kaydsado lagana qaybiyo oo mudada dheer ah, dhiirigelinta mashaariicda waraabinta si loo taageero hannaanka wanaagsan ee beeraha, dayactirka kanaalada iyo jiinka webiyada, dayactirka iyo dhisidda kaabayaasha bulshada sida bukaan-socod-eegtooyinka iyo isbitaalada.

Dhibaato bani’aadamnimo kasta waxaa jira malaayiin qof oo murugo shakhsiyadeed haysato oo dadka ay u adkeystaan, xitaa marka ceelasha ay buuxaan, ogow qiimaha uu leeyahay biyaha, iyadoo qiimahaas ay leedahay waa in aad u ilaalisid sida hantida ugu qiimaha badan.

**Daniel Gerard O-Malley**
Madaxa ku xigeenka Ergada ICRCda ee Soomaaliya

# KOR LOO QAADAYO WACYIGA SI LOO BADBAADIYO NOLOL

Sanadihii dhowaa Soomaaliya waxaa la soo wariyey boqolaal dhimasho daacuun. Xaaladahan, ugu yaraan waxaa loo nisbeyn karaa markay ugu yar tahay maqnaanshaha qeyb ka mid ah biyaha iyo kaabayaasha bulaacadaha ka dib tobaneeyo sano dagaal socday. Tusaale ahaan xerada barakacayaasha Dalxiis ee Kismaayo, roobab culus ayaa ka dhashay in uu dilaaco cudurro ayna ku jiraan shuban, daacuun iyo tiifow.

Raaqiya Cabdi* waa hooyo leh shan caruur oo ku nool xerada Dalxiis. Banaanka aqalkeeda waxaa uu ka sameysan loorar jeex jeexmeen iyo wargeysyo la isticmaalay oo dun iyo cirbad la isku kabkabay. Aqalkeeda yar waxaa hor mara bulaacad furan, buur yar qashin ahna wuu ag yaala. Markii roobabka culus bilowdeen waxay ku walaacsaneyd in gurigeeda baabi'i doono, laakiiin bedelkii waxaa yimid caqabad ka sii xun: biyo wasakheysan ayaa labadeeda wiil qaadsiiyey daacuun.

Sayga Raaqiya wuxuu ka shaqeyn jiray Jowhar oo Kismaayo u jirto in ka badan 450 km, marka ma awoodin in uu caawiyo. Nasiib wanaag, qof darawal ka ah gaari xamuul ah ayaa u soo qaaday Isbitaalka Guud ee Kismaayo oo wiilasheeda ka heleen daaweyn.

## KU DHIIRATAY ISBEDEL

Ladnaanshaha labadeeda wiil iyo cudurkan oo ku soo noqnoqdo bulshadeeda ayaa Raaqiya ku dhiirigeliyey dadka kale oo deggan xerada in ay wax barto oo abaabusho si sare loogu qaado ka warqabka khataraha daacuunka. Waxay tababar ka heshay Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), hadda waxay tahay mutadawac toddobaadkiiba asaageeda ku caawiya in dadka kale ku sugan xerada ku wargeliyaan muhimadda ay leedahay joogteynta degaan fayo-dhowr fiican leh.

"Haddii aan ogaan lahaa muhimadda ay leedahay gacmo-dhaqashada hobboon, iyo biyaha oo la kar kariyo

Waxaan dhibbanayaasha colaadaha iyo musiibooyinka ku caawinaa u hagaajinta helitaanka biyo nadiif ah oo ammaan ah.



©Mohamud Miraj/ICRC




Raaqiya waxay sawir weyn ku muujineysa sida kor loogu qaadi karo arrimaha fayo-dhowrka.

ka hor inta aan la isticmaalin, maanta waxaan sheegi lahaa sheeko taa ka duwan, waxay aheyd faham la'aan waxa tani sababay ," iyada ayaa sidaan sharaxday.

"Waa in aad nadiifisaan degaankiina, musqushiina (suuligiina) ku nadiifisaan biyo ku filan ka dibna xaqiiji in gacmahaaga iska dhaqdo. Sidaan ayaa ka heleyna nolol caafimaad leh, mana laga yaabo in daacuun nagu dhaco" Raaqiya ayaa ku wargelineysa haweenka ka qeyb qaadanaaya tababarka.

## FARAGELIN

Guddiga Caalamiga ee Laanqayrta Cas (ICRC) iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay tababar u fidiyeen 65 qof oo Kismaayo ku nool ujeedadana ay tahay in sare loo qaado ka warqabka khataraha daacuunka iyo tallaabooyinka ay tahay in la raaco si looga hortago in cudurkan sii faafo.

Nick Rowe, oo taageeraya barnaamijyada fayo-dhowrka ICRC-da Soomaaliya wuxuu yiri waa wax ku dhiirigelinaya in aad aragto bulshooyin hoggaanka u qabanaysa sare-u-qaaoliolola warhaynta khataraha daacuunka.

"Daacuunku waa cudur ku badan Soomaaliya dadkana waxay ku noqon kartaa mid aad ugu adag in daacuunka daawo u helaan iyo cudurada kale biyaha ka dhasho," sidaas ayuu sharxay. "Bulshooyinka oo lagu caawiyo in ay fahmaan sida looga hortago cudurka daacuunka, ayaa tirada dadka ku dhaca daacuunka si weyn hoos loogu dhigi karaa.Si kastaba ha ahaatee,si loo cirib-tiro cudurka,  dadku waxay u baahanyihiin helitaanka biyo nadiif ah iyo tas-hiilaadka fayo-dhowrka habboon. Kuwaan la'aantood, dillacidda cudurka wuu sii soconaaya in uu dad ku dhaco naftana ka qaado."

Calaamadaha daacuunka waxay bilaabmi karaan sida ugu dhakhsiyaha badan dhowr saacadood ama inta ugu dheer shan maalmood ka dib cudurka marka la qaado. Inta badan, calaamaduhu waa dhexdhexaad, laakiin qiyaas ahaan labaatankii qof cudurka ku dhacay mid ayaa ku dhacaya shuban-biyood daran oo la socdo matag kaas oo si dhakhso ah u horseedi kara heer khatar fuuq bax .Inkastoo dad badan oo qaba cudurka yeelan karaan astaamo yar ama aan yeelaneyn astaamo ayaa weli sii fidin kara cudurka gaar ahaan meelaha tas-hiilaadka nadaafadda guud aan ku filneyn.

ICRC waxay SRCS ku taageertaa qalab iyo tababar ku saabsan fayo-dhowrka, maanta Raaqiya waxay casharadii baratay u isticmaaleysaa in ay barto dadka kale, si looga hortago in daacuunka sii dillaaco. Sidoo kale waxaa talooyin fudud oo ku saabsan fayo-dhowrka fariin qoraaleed ahaan loogu diray dad gaaraya 29,591.

*Ma aha magaceeda dhabta ah

# KA DIB MARKII LA DAYACTIRAY BAM AYAA BIYO LAGU SHUBAY BACO QUUDIYEEN QOYS

Bakhdaad Cabdi*, waa hooyo Soomaaliyeed waxay jiirgaankeedi buluuga ah ku buuxisaa biyo laga keenay bar- biyood dhowaan Guddiga Caalamiga Laanqayrta Cas (ICRC) dayactirtay. Bambka dib lo hagaajiyey wuxuu u ogolaaday in ay furato ganacsi cusub: bacaha balaastiiga biyaha ku jiraan waxay ka iibisaa darawalda baabuurta ka shaqeeysa waddo mashquul badan oo ku taalo galbeedka Soomaaliya.

"Maalintii waxaan helaa $1. Waan ogahay ma aha lacag badan laakiin anigu lacag badan ayey ii tahay. Lacagtaan yar waxaan ku daboolaa baahiyaha Labadeyda canug," waxaa sidaa tiri Bakhdaad oo 38-sano jir ah waana qofka reerka masruufa.




Bakhdad Cabdi waxay xirxireysa bacaha biyaha ku jiraan una diyaarineysa in ay ku gaddo Dhuusamareeb, Soomaaliya.

## SADDEX KIILOMITIR OO KA HORTIMID 200 MITIR

Si caruurteeda iyo ganacsigeeda biyo ugu soo dhaamiso, Bakhdaad waxay 200 mitir u socotaa barta laga helo biyaha, waxay sii martaa dukaan si ay uga iibsato dhuxul ka dibna waxay aaddaa gurgiga, si biyaha u karkariso waxay ku shubtaa digsi-gacan ku sameys ah isla deegaanka lagu sameeyey. Waxay biyaha qaboojisaa 10 daqiiqo ka dibna waxay ku shubtaa baco ka sameysan balaastiik.

Iyadoo wadato qaboojiye ku buuxaan bacaha biyaha waxay lugeysaa saddex kiiloomitir si ay u gaarto jidka weyn. Halkaas qoraxda ah ayey taagnaata iyadoo sugeysa darawalada baabuurta xamuulka oo soo maraan wadada weyn isku xirta Dhuusameeb iyo Guriceel.

"Midkiiba waxaan ku iibiyaa 2000 Shilin Soomaali, maalintii waxaan iibiya ku dhowaad 20 xabbo oo noqoneysa qiyaastii 2 doolar, way igu filantahay waan ku daryeeli karaa labadeyda caruur," sidaa ayey tiri.

Bakhdaad waxay ka qaxday Muqdisho ka dib dagaalkii sokeeye ee 1992-dii una guurtay Dhuusamareeb. Ka hor inta uusan si xun u xanuunsan seygeeda laba sano ka hor, wuxuu laf-dhabar u ahaa qoyska waana taa Bakhdaad ku qasabtay in ay istaagto qoyskana daryeesho.

"Waxaan iibin jiray shaah. Waxaan shaah ka iibin jiray xoolaleyda deeganka laakin waan iska daayey markii aan ogaaday in wax fiican laga heleyn.

Illin yar ee aqalkeeda ku yaalo tuulaola Qoqob waxaa laga arki kara tiro geel iyo dameero u ordayaan in ay gaaraan barta biyaha. Magaalada Dhuusameeb waxaa lagu yaqaana dadkeeda xoolo-dhaqatada ah. Magaaladu waxay keliya leedahay dhowr dhismo oo leh meelo lagu tukado oo xilliyada jilaalka xoolo-dhaqatadu ku kulmaan kuna qabsadaan Alle bari roob-doon.

Colaada Soomaaliya waxay socotay in ka badan labaatan sano.Meelaha biyaha laga heli jiray oo gaboobeen waxaa looga tagay xaalad dayactir la' aan ama bur bur taa oo ka dhalatay gabow iyo dayacid. Inta badan bulshada halkaan ku nool waxay quud ahaan keliya ku tiirsanyihiin xoolaha, marka laga reebo Bakhdaad oo dooratay in ay tijaabiso hawl kale.


ICRC waxay tuulada Qoqob u dayactirtay il-biyood oo caawintey ku dhowaad 10.000 qof oo halkaas ku nool. Ceelka waxaa maamula bulshada.Iyadoo laga soo xiganaayo Alexandre Farine, oo isku-dubarida mashaariicda biyaha ICRC Soomaaliya, biyuhu waa walaaca deg degga ah ay qabaan xoolo-dhaqatada Iyagoo ku nool bey`ad adag.

"Waxaan garwaaqsanay in mugga haanta qaadi karto aanu ku filneyn bulshada xoolo-dhaqatada iyo xoolahaba oo ku tiirsan ceelkan. Taana waa sababta aan u dhisnay haan qaadi karto biyo badan," Alexandre ayaa yiri.

*Ma aha magaceeda dhabta ah

# FARRIIN QORAALEED AYAA LA DIRAY SI SARE LOOGU QAADO DADAALADA LOOGA HORTAGAYO DAACUNKA

Waa farriin qoraaleed samata bixin karta nolol: "Ku dhaq gacmahaaga saabuun caruurtaadana u sheeg inay sidoo kale yeelaan." Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) ayaa waxay markii ugu horeysay farriimo teleefonka gacanta ugu direysaa in ka badan 20,000 dad ah oo ku sugan dalka Soomaaliya si ay si dhaqso ah ugu gudbiso tilmaamo ku saabsan ka hortagga daacuunka.



Rita Nyaga/ICRC

Farriin ka timid ICRC si loo dhiirigeliyo dhaqamada wanaagsan ee fayo-dhowrka.

Farriimaha wargelinta ee dhiirigelinaya hababka fayodhowrka wanaagsan ayaa waxaa loo dirayaa dadka deegaanka ka dib markii dhowaan daacuun ka qarxay Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya.

"Tan iyo markaas in ka badan 1,000 qof ayaa geeriyootay ka dib markii daacuun ka dillaacay gobolka Shabeelaha Hoose," sidaa waxaa yiri Maurizio Campailla, iskuduwaha barnaamijka caafimaadka ee ICRC-da Soomaaliya. "Waxaynu rabnaa inaan farriinta si toos ah ugu dirno bulshooyinka ay aafeeyeen dagaalada sanadaha socday, jawiga cimilada qalafsan iyo barakac si looga fogaado dhibaato dheeri ah iyo dhimasho."

Tan iyo bilowgii bishii Abriil, madaxda caafimaadka ee ICRC iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay todobaadkiiba gudahiisa gobolka Jubbada Hoose daweeyeen 1,000 xaaladood oo daacuun ah. Tan iyo horaantii bishii Maajo ICRC iyo SRCS waxay kaloo maalin kasta idaacadaha ka sii daynayeen farriimo ku saabsan ka hortagga cudurka daacuunka.

Daadadku, waxay bulshooyinka u baylihiyaan daacuun iyo cudurada kale ee ka dhasha biyaha kuwaas oo halis dhinaca daacuunka iyo cudurrada ka dhasha biyaha. Magaalada Beledweyne, qoysaska ku nool xeryaha barakacayaasha tirada badan waxaa dhowaan ku qasbanaatay inay ka baxsadaan biyo sare u kacay. ICRC iyo SRCS way sii wadayaan inay ka jawaab bixiyaan baahiyaha bani'aadamnimo halkaas ka jirtay iyagoo bixinaya wadatashiyo dhanka caafimaadka iyo dawooyinka ah. Raashiin ayaa loo qeybinayaa kuwa ugu nugul. Ku dhowaad 850 qoys oo ay hogaamiyaan haweenka ku nool Beledweyne ayaa ka mid noqday kuwa heley farriin qoraaleed ku saabsan daacuunka.

Fatahaada magaalada Beledweyne.




Aden Janjane/ICRC

# SHEEKADA ABAARTA

Lix sano ka dib markii abaar masiibo ah oo ay ku dhinteen in ka badan rubuc milyan oo qof oo ku nool Soomaaliya ayaa dalku/waddanka dareema-ya inay soo food saareyso xaaladdaha kharribaada ah ee macruufka ah.Mar labaad, colaada iyo abaarta daba-dheeraatay oo isbiirsadeen ayaa dishay dad gaaraya 6.2 oo qof oo ah in ka badan kala bar dadka dalka ku nool kuwaas oo u baahan gargaar bani'aadamnimo oo deg deg ah. Cabsida muuqata ee macluusha iyo isbedelka yaabka leh ee la mid ah dhibaatooyinkii 2011-kii, hay'adaha bani'aadamnimada oo ay ku jirto Guddiga Caalamiga ee Laanqayrta Cas (ICRC) ayaa sii wada dadaalada guurguuraya si looga hortago natiijo la mid ah. Cunto deg deg ah ayaa loo qeybiyey qoysaska, oo ay ku jiraan barakacayaasha si loogu caawiyo in ay dabbaraan xaaladaha. Lacag caddaan ah ayaa sidoo kale la siiya qoysaska ku sugan meelaha suuqyada ay ka shaqeynayan.Waqtiyadan oo kale biyuhu waa qaali, wuxuuna keena khatar kale iyadoo qoysaska abaarta ku dhufatay miciin bidaan isticmaalka ilo aan la daweyn.Iyadoo caawinaad wax ku ool laga helaayo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) marka lagu daro qaybinta kiniiniyada koloriinka ah ayaa waxaa la sameeyey ololeyaasha dhiirigelinta fayo-dhowrka. Dadaaladan waxay bulshooyinka ku caawisaa in ay si fiican u dabbaraan caqabadaha ay keeneen sahayda biyaha oo aan ammaan ahayn.

**KALA BAR TIRADA DADWEYNAHA**
Ma haystaan biyo ammaan ah sababta oo ah, amni darri, kaabayaasha oo liita iyo tirada xaddidan ee adeeg bixiyeyaasha.

**27,677**
**QOF**
ayaa ka faa'ideystay hagaajin iyo sii qodid lagu sameeyey 38 ceel-gacmeed

**286,890**
**QOF**
ayaa dib-u-helay biyo nadiif ah oo la cabi karo ka dib markii 52 ceel laga qabtay shaqo dhisme iyo dayactir ah

## WAXA AAN KA DHAHNAY



**"Waa in aan si deg deg ah u dhaqaaqnaa si aan uga hortagno masiibo ka dhacda Soomaaliya**
-Jordi Raich
Madaxa ICRC-da Soomaaliya



**"Dhibaato macluul ayaa ka soo muuqata wadamada Afrika iyo Bariga Dhexe, meelaha sida Koonfurta Suudaan, Soomaaliya, Nigeria iyo Yaman**
-Peter Maurer
Madaxweynaha ICRC



**"Waa waqtiga oo lagu xisaabtamaayo in wax la qabto! Maadaama macluul ay weli ka soo muuqato #Soomaaliya, tan ballaaran ugu waxaa looga hortagi karaa haddii aan si dhaqso ah wax uga qabano.**
-Dominik Stillhart
Agaasimaha Hawlgalada ICRC



## SIDA AY U DHACDAY

| Abriil | Luulyo | Oktoob |
|---|---|---|
| Roobabka Gu'ga | Hagaa | |

Xilliga jilaalka oo bilowday iyadoo roobabkii la filaayey 2015-kii oo aan di'in ayaa ku so
xoolo-dhaqatada ah oo ku tiirsan xoolaha ayaa ah kuwa sida xun u saameysay iyadoo
oo Soomaalida inteeda badan ay la qabsadeen. Ilaa iyo bartamihii 2017-ka, Roobabka
celceliska. Mar kale qoysaska waxay la kulmeen dhibaato naxriis daran taas oo si dha
Roobabku, haddiiba ay da'aan ma ku filan yihiin in ay joojiyaan xilliga jilaalka oo sharta

## WAXA AY KA DHAHEEN



“Ma aqaan waxa ilmaheygu cuni doonaan. Dhab ahaantii waa wax aan maankaagu u rooneyn

**526,439**
**QOF**
ayaa ka faa’ideystay helitaanka biyo ammaan ah oo nadiif ah iyadoo loo maray qaybinta kiniiniyada lagu nadiifiyo biyaha iyo ololeyaasha dhiirigelinta fayo-dhowrka

**18,362**
**QOF**
iyo xoolahooda ayaa waxay ka faa’ideystay rakibaadda dhismayaasha ku meel gaarka ah oo biyaha lagu keydsado oo afka ka furan, iyo 50 xabbo oo daro xoolaad ah



“Dhammaan 43-ka sano oo aan jiro, anigu ma arag abaar saan u xun.





“Waan halgami doonnaa haddii Alle uu roob na siiyo, alxamdulillaah, keliya waxaan sugayna roob.

ar | Disembar | Maarso

**Roobabka Deyrta** | **Xilliga Jilaalka**

o fiday ilaa 2017, bil kastana ay ku dhimanayeen xoolo iyo dalag badan. Beeraleyda
aan jirin baad iyo biyo toona taas oo halis gelisay hab-nololeedkii xoolo-dhaqatada
Gu’ga oo la filaayey intii u dhaxeysay bilihii Abriil iyo Juun ayaa ka hooseyey
khso ah u noqoneysa wax iska caadi ah iyagoo rajo ka qaba roobabka soo socda.
badan?


ICRC




Xoolo caafimaad qaba waa haybad/martabad sababta oo ah marka laga reebo Iyaga qoysaska siiyaan hilib iyo caano, suuqana waxay looga siistaa qiime sare. Meelaha ceelasha ku yaalaan waxaa la geeyey daro si xoolaha ugu haraad baxaan.

# SAWIRO KA HADLAYA BIYAHA

Bulshada Soomaaliyeed biyuhu wuxuu u yahay kheyraad qaali ah, kaas oo si weyn ugu tiirsan Xoolaha iyo beerashada oo ku xiran hab-nololeedkooda. Sawiradan waxay soo bandhigayaan hawlaha ICRC ay ka fuliso Soomaaliya oo dhan




Xilliga jilaalka waxaa la bixiya daro ku meelgaar ah si looga hortago buux-dhaafka ceelasha.




Meelaha laga dhaansado biyaha sida midkaan oo ku yaala Qardho oo bulshada maamusho ayna dayactirto waa siyaabaha ugu caawino helitaanka biyo oo nadiif ah.




Pedram Yazdi/ICRC

Caruur Soomaaliya ku sugan oo faraxsan iyagoo midba markiise biyo ka cabaya tubo goor dhow la rakibay.



Pedram Yazdi/ICRC

Beeraleyda waxay ICRC ka helaan talo beereed iyo abuur ay beertaan. Sanadkii 2016-kii waxaa la qoday 30 ceel iyo ceel-gacmeedyo, waxaa kaloo la dhammeystiray 27 mashaariic waro ah.




Pedram Yazdi/ICRC

Hannaanka ammaanka iyo cimilada oo isbedbedlay sida abaaraha iyo daadadka waxay bulshooyinka ku qasbaan inay si joogto ah u guur guuraan. Si loo hubiyo in bulshooyinka ay helayaan biyo joogto ah, ICRC-du waxay u dayactirta meelaha biyaha laga helo, ceelaha iyo ceel-gacmeedyada.


# TIRO AHAAN JAWAAB-CELINTA LAGA BIXIYEY BIYAHA

## JANNAAYO – DISEMBAR 2017

Soomaaliya sanado soo jirtay colaado iyo dhibaatooyinka cimilada sida abaarta ayaa carqaladeeyey helitaanka biyo nadiif ah. Annagoo u qodeyna ceelal, ceel-gacmeedyo iyo u dayactirno nidaamyada biyaha ayaa ugu hagaajinnaa helitaanka biyaha. Waxaan sidoo kale biyo siinnaa dadka ku barakacay dagaalada iyo daadaka. Iyada oo lala kaashanaayo SRCS, waxaan qoysaska ku taageernaa qalabka biyaha lagu nadiifiyo iyo macluumaad ku saabsan sida loo daweeyo biyaha qoyska uu isticmaalo. Meelaha daadadku u nugulyihiin waxaan loorar ciid lagu shubay ku xoojinnaa jiinka webiyada si looga hortago fatahaad.

**52**

Ceel ayaa laga qabtay shaqo dhismo iyo dayactir ah. In ka badan 286,000 qof ayaa awooday in ay dib-u helaan biyo nadiif ah oo la cabbo.



**38**

Ceel-gacmeedyo ayaa la hagaajiyey sii qoday si loo koordhiyo helitaanka biyo nadiif ah. Waxaa ka faa'ideystay dad kor u dhaafaya 27,000 qof.

**46**

Tirada waraha lagu keydiyo biyaha roobka ee la dhisay. Waxaa ka faa'ideystay dad kor u dhaafaya 290,000 qof.

**50**

Haamanka kor ka furan oo biyaha lagu keydiyo oo qaadi karaan 5,000 liitar oo ay la socoto daraha xoolaha ayaa la rakibay. Waxaa ka faa'ideystay dad kor u dhaafaya 18,000 qof.

Khariiradaan ujeedkeedu waa macluumaad keliya mana laha muhimad siyaasadeed.

ICRC

# FATAHAADA KA DIB 30,000 QOF AYAA HELAY CUNTO IYO BIYO LA CABBO OO NADIIF AH

Daadad ka dhacay magaalada Beletweyne ee dalka Soomaaliya ayaa barakiciyey kumunaan dad ah kuwaaasoo iminka u baahan cunno iyo biyo la cabbo oo nadiif ah. Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) iyo Ururka Bisha Cas (SRCS) waxay gargaar deg deg ah u qeybiyeen in ka badan 30,000 qof si loo yareeyo dhibaatooyinka ka dhashay daadadka.



Fatahaada magaalada Beledweyne.

ICRC iyo Bisha Cas waxay cunto qabteen muddo shan maalmood. Cuntadaas oo ka koobneyd, bariis, saliid, digir iyo maryo kaneeco.

“Daadadkaan waxay ahaayeen kuwii ugu xumaa muddo sanaddo ah. Waxay saameyeen magaalada badankeed iyo daafaheeda. Marka ay dadka u dhaqaaqaan dhulka taaga ah, waxay u baahnaayeen wax walba. ICRC waxay bulshada aadka waxyeelada u soo gaartay siinaysaa cunto iyo agab kale oo aasaasi ah, biyo nadiif ah iyo daryeel caafimaad. Tani waxay awood u siinaysaa inay ku sii moodaan intay ka bilaabayaan dib u dhiska guryahooda,” sidaa waxaa yiri Alberte Jabre, oo ah isku duwaha ICRC ee degaanka.

Ku dhowaad 10,000 kaniinka biyaha ayaa la qaybiyay ayadoo qoys walba uu helayo 20 xabo oo kaniini ah, kaa oo ku filan muddo bil ah. Hal kaniini wuxuu nadiifin karaa 20 liitar oo biyaha la cabo ah.

Daadadka waxay ka dhasheen roobab xoogan oo ka da’ay qeybta dhulka sareeya ee Itoobiya kaas oo sababay in Webiga Shabeelle uu sameeyo qar shub. Shaafi Ibraahim, oo ah oday deegaanka ka tirsan, wuxuu yiri biyaha daadka waxay burburiyeen haruurkii iyo inay beerihii ay noqdeen kuwa aan la geli karin.


Biyaha fatahaada dalagga beerahana lama gali karo, waxaa sidaa yiri oday degaanka ka tirsan. “Daadadku waxay burburiyeen ku dhowaad waxwalba. Bulshada badankeed ee halkan waxay ka shaqeystaan ganacsi yar ee suuqa deegaanka. Ma sii shaqeyn karaan maadaama meeshu biyo qarqiyeen. Waxaanu filaynaa muddo bil gudaheed inay qalasho aana bilaabi karno dib u dhiska nolosheena,” ayuu yiri Ibraahim.

Beledweyne waxay hoy u tahay 31,000 oo dad barakacayaal ah, kuwaas oo badankoodi ka soo cararay dagaalo ka dhacay degmooyinka la deriska ah ee Jalalaqsi iyo Bulo Burte. Dadka degaanka oo ku nool meelaha hooseeya waxay u guureen dhulka sare ee Ceel Jaalle oo shan kiilo - mitir u jirta Beledweyne.

Si looga jawaab celiyo abaarta Soomaaliya waxaan dhisnay haamanka qaabka basasha leh.



# SIDA LOO ISTICMAALO AQUATAB




- Si loo hubiyo in biyuhu uu nadiif yahay oo la cabi karo, iska karkari ama ku dawee kiniinidda koloriinka ah kuna keydo weelal nadiif ah
- Iska dhaq gacmahaaga ka hor inta aadan wax cunin iyo ka dib booqashada musqusha (suuliga)

facebook.com/icrc
twitter.com/icrc
instagram.com/icrc

**Ergada ICRC-da Soomaaliya**
Wadada Denis Pritt
S.B 73226-00200
Tel. +254 20 2719 301
Nairobi. Kenya

Xafiisyada Soomaaliya waxay ku kala yaalaan Muqdisho, Kismaayo,Garoowe, Baydhabo iyo Xuddur
www.icrc.org
© ICRC, Disember 2017

ICRC

Badanaa iyadoo la shaqeyneysa la hawl-galayaasheeda Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, ICRC waxay dadka ku nool adduunka oo dhan oo ay saameysay colaadaha hubeysan iyo qalalaasaha kale u qabataa wax kasta oo ay awooddoo iyadoo ku caawisa sidii loo dhawri lahaa sharaftooda iyo iyadoo ka yareyneysa dhibaatadooda. Ururku asagoo horumarinaya xoojinayana xeerka bani'aadamnimada iyo u doodaya mabaadii'da caalamiga ee bani'aadamnimada ayaa wuxuu kaloo isku hawlaya inuu ka hortago dhibaatada

2017 0557/402 03.2018 3000